

# 4

## Shuruuda ugu yar ee Ilaalada Xaafada

### 1. Feejignaanta

Feejignow. Ka wac booliska 114 14 haddii aad ogaato wax hawl shaki ah, ama wac 112 si aad uga warbixiso inuu fal dembi socdo. Warbixina kasta oo aan ahayn gurmada waxaa lagu samayn karaa iyaddoo la marayo

[www.polisen.se](http://www.polisen.se).

### 2. Haddii aad tagto

U sheeg jaarkaaga inaad tegayso.

### 3. Alaabta qiimaha leh

U kaydi alaabta qiimaha leh si badbaado ah -- ma jiraan meelo badbaado ah oo aanay tuugto helaynin.

### 4. Tallaabooyinka ka hortagga ah

Daraasadee oo ka baro tallaabooyinka ka hortagga ah bogga

[www.samverkanmotbrott.se](http://www.samverkanmotbrott.se).

## Sidee loo kordhiyaa badbaadada dhismahaheena?



**Ujeedada Ilaalada Xaafada (Grannsamverkan)** waa in la yareeyo dembiga oo la kordhiyo badbaadada dhismahaaga, oo keenaya raaxo wayn iyo nabad niyada ah.

**Si looga bilaabo** Ilaalada Xaafada dhismahaaga dabaqa ah, la xidhiidh jaarkaaga oo waydii cida xiisaynaysa. Beddelkeed, waxaad waydiin kartaa mulkiilaha guriga ama guddida la shaqaynta guriyeynta inay la xidhiidhaan dadka kale ee degen. Haddii ay jiraan xiise ku filan, tallaabada xigta waa in lala xidhiidho booliska maxaliga ah si loo dhiso Ilaalada Xaafada.



## Tilmaan:

Kala xidhiidh booliska [www.polisen.se](http://www.polisen.se) si aad u bilowdo Ilaalada Xaafada gudaha dhismahaaga iyaddoo bilaash ah maanta.

## Ka hortag dembiya dhismaha dabaqa ah addoo abaabulaya Ilaalada Xaafada

Akhri wax badan oo ku saabsa Ilaalada Xaafada bogga [www.samverkanmotbrott.se](http://www.samverkanmotbrott.se)

